1] HORDAC

Anagoo ah Somalida qurba joogta ah ee ku kala dhaqan caalamka Yurub USA Canada Australia Newzeeland kana kala yimi dhamaan gobolada dalka oodhan
Maadaama aanu nahay dada iska leh wadanka soomaaliyeed oo kadhaxlay awoowayaashood Waxaan si wada jir ah u soosaarnay
Qoraal midaysan oo aanu ku muu jinayno inaan hiil iyo hooba lagarab taaganahay walaalahayaga soomaaliyeed ee dhibaatadu haysato sidaan gacan buuxda ugu siin lahayn dib usoo noolayta qaranimadeena dhowaanahanba ay saamayeen dagaalo sokeeye oo burburiyey noocwalba oo nololeed oo soomaali lahaan jirtay

2] BURCAD BADEEDA

2.1 waxaan soo jeedinaynaa waxka bedelka burcad badeedka ka jirta xeebaha soomaaliya taas oo ay kafaa iideystaan dad ajanib ah oo ku nool wadamada horumaray adeegsadana awood iyo inyar oo soomaali ah.
2.2 Sababbaha keenay burcad badeeda kuna kalifay kaluumaysatadii soomaaliyeed inay isu bedelaan burcad badeed waa kadib markii maraakiib waaweyn oo awood lihi kusoo bateen xeebaha soomaaliyeed iyagoo weliba gooyey shakadihii kaluumaysatada iyo weliba maraakiib kale oo sun ku aastay badaha soomaaliyeed ama kala baxay macaadiin taas oo ay bulshada caalamku iska idho saabtay dhibaatooyinka ay ugeysteen mush tama ku nool Soomaaliyees xag caafimaad dhaqaale iyo abniba.
Ku xadgudubka naxariisdarada ah ee lagula dhaqmay biya badeedka soomaaliyeed oo ah mid aan sharci ahayn ayaa waxaa wax ka qoray hay ada aduunka u qaabilsan badaha hayada cuntada iyo beeraha aduunka.

Laakiin dacwadaahaas oo dhan waxay noqdeen mid qaramada midoobay ay iska indho tirto oo wadamadii ku xadgudbay ay si ula kac ah usii wadaan axmaqnimada ay kula kacayaan xeebaha soomaaliyeed. Lagamana sooqaadin waxba qayladii kayeeraysay kaluumaysatada soomaaliyeed.
Qoraal kii ay burcad badeeda soomaaliyeed u soo gudbiyeen shirkii lagu qabtay baxrayn12-14 Dec (Manama dialogue Bahrain) iyo UNDP/UNPOS Nairobi) 10-11 Dec.
Waxay sababtay fahan lafahmo sababaha keenay ianay burcadbadeedku samaysmaan laakiin aaminaadii la aaminay qaraarkii UN Golaha abniga ee tirsigiisu ahaa (1725, 1816 and 1851)
Ayaa keenay dib u eegida qodobadii ay keeneen kaluumaysatadu.

2.3 Waxaanu taageeraynaa dadaalada bulshada caalamka gaar ahaan Midowga Yurub iyo Union Atlanta Naval Force ay Qaramada midoobey u xilsaartay hirgelinta qaraarkii Golaha Abniga ee tirsigiisu ahaa 1816 oo ahaa laalinta iyo maxkamad taagista wadamada ku xadgudba xeebaha Soomaaliya iyo baabi inta burcadbadeeda laakiin Muhiimada koowaad waa inay ahayd in laga hortago

3] 3.1 SUNTA LAGU AASO XEEBAHA OOMAALIYA

Markaanu aragnay qoraalkii Qaramada misogamy kasoo saartay in dada ku nool magaalooyinka iyo tuulooyinka ay ku dhacaan xanuuno aan hore looga baran dhamaan wadanka kuwaas oo aad uga badan sida caadiga ah oo tirada dada kacabanaya ay markasta sii kordhayso
Cuduradaas oo ayka midyihiin cudurada maqaarka ku dhaca afka caloosha oo aan caadi ahayn (Respiratory infections, mouth ulcers and bleeding abdiminal haemorrhages and unusual skin infection)
Cuduradan dhamaantood waxay caanku yihiin oo keena sunta Nuclearka iyo wershedaha oo lagu aasayo xeebaha soomaaliaya sanadahan.

3.2 waxaan aad uga xunahay sida looga hurdo bulshada caalamku inay arimahan xataa sooqaadaan oo laga dhigo wax ku jira wada hadaladooda.
Waxaan codsanaynaa sida ugu dhaqsaha badan loogu diro khuburo soo baarta
heerka uu gaarsiisanyahay dhibkani talona kasoo jeedisa sidii wax looga qaban lahaa.

4] NABADAYNTA

Waxaan goobjoog u ahayn in mararbadan laysku dayey in nabad lagu soo dabaalo Somalia laakiin uu markasta dhaqso u burburo. Kasaaristii Ethiopia kala baxday ciidankeeda Somalia iyo wadamada Africka oo iyaguna muujiyey inay niyad yar uhayaan inay ciidamadooda geeyaan Somalia mana jirto caawimo caalami ah ama go aan caalamku ka midaysanyahay,
Hadana waxaa sii korday dhibka iyo faqiirnimada ay keenayso dagaaladan sokeeye oo dabada dheeraaday taas oo galaafatay nolol maal iyo moodba.

5] GOBOLADA

Waxaan ka qayb qaadanaynaa gacan buuxda dhismaha iyo horumarinta wadankayaga hooyo
Waxaa si cad noogu muuqda khatarta badan ee wadankeena ku soo socota ama uu ku sugan yahay ku waas oo ay sababeen coolaada joogtada ah ee ka taagan bulshada walaalaha ama danwadaagta ah ee soomaaliyeed kuwaas oo dhaqan diin wada dhalasho intaba wadaaga . ColaadaasI waxay keentay in ay meesha kabaxdo dantii guud ee bulshada sababtona dhimasho dhaawac burbur iyo dawladnimo la aan xaaluf.

6] UJEEDOOYINKA GOAANKA QURBAJOOGTA

Ilaa hada qurba joogta soomaaliyeed ma aysan Kaqaadan qayb muhiim ah barnaamijyada ku saabsan dib usoo noolaynta qarankeenii burburay laakiin waxaa ay hada go aan sadeen in ay awood iyo kartiba uleeyihiin inay si kalsooni ku jirto uga qayb qaataan banaamijyada faaiidada weyn uleh dhamaan mujtamaca soomaaliyeed.
Waxaan rajaweyn ka qabnaa inaan kaalin muhiim ah iyo gacanba siino walaalahayaga soomaaliyeed ee u baahan nabad waarta iyo horumarka dalkooda.

ku xadgudubka axmaqnimada ah ee xeebaha Somalia.
Waxaanu u baahanahay in sicad naloogu cadeeyo in ujeedadu tahay nabada iyo badbaadinta xeebta soomaaliyeed.

2.4 waxaanu rabnaa balanqaad masuuliyadi kujirto oo aanu helo cid masuuliyadeeda qaada oo lagula xisaabtamo fulinteeda.
Waxaanu taageeraynaa in duqayda indheergaratada iyo samadoonada gobolada soomaaliyeed ay awood buuxda uyeeshaan gacana lagu siiyo kahor taga burcad badeeda iyo in shuruud la aan ku siidaayaan maraakiibta ay haystaan.

2.5 waxaanu ku dhiiri gelinaynaa dhamaan dekedaha Soomaaliya ay diiwaangeliyaan maraakiibtooda ganacsiga iyo dhamaan kaluumaysatada marka layla fahmo iyaga iyo Qaramadamidoobay ay u soodirto ciidan ilaalineed oo qabta markabkii aan diiwaan gashanayn ama si sharcidaro ah uga kaluumaysanaya xeebaha Soomaaliya cidii ku xadgudubtana awood loo siiyo maxkamad lagu soo taago.

Waxayna balan ku qaateen in siwada jir ah ay ula shaqeeyaan dhamaan bulshada ku nool gobolada soomaaliya iyo bulshada caalamka ee jecel nabadayta iyo horumarka xuquuqda insaanka.

Saxiixa goaakan kadib waxaan samaynay qorshayaal aanu ku suuro gelinayno Gooaanada,
si aanu ugaarno nabad iyo horumar waara.

7] SHABAKAD MIDAYSA QURBA JOOGTA

waxaan dhisaynaa shabakad isku xirta qurba joogta soomaaliyeed kuwaas oo ay aamin buuxa ku qabaan bulshaday Matalaan.

8] HIRGELINTA MASHAARIICDA

Waanu hir gelinaynaa mashaariicdan anagoo u kala hor marinayna sida ay ukala muhiimsan yihiin si loogaaro nabad waarta iyo horumar.
Waxaanu gacan siinaynaa dawlada guud sidii ay u hanan lahayd dhamaan adeega bulshada dibna umatalilahayd shacbigeeda kala firirsan kalsoonidiisa ugana mid noqon lahayd marlabaad faamilka dawladaha caalamka.

9] DIB UNOOLAYTA IYO IS AAMINKA UMADA

Waxaanu aragnay in ay muhiim tahay kawayaga dibada kunooli inaan u horseedno sidii umada soomaaliyeed aanu soo celino wada shaqayntii iyo is aaminka bulshada meelna ay iska dhigaan kala duwanaanshaha u keenay burburka iyo colaada soo na celiyaan wada dhalashadoodii dhaqan wadaagii kumanaanka sano aan ku dhaqmaynay ee aan ka dhaxalay awoowayaasheen.

10] HORUMARINTA MASHAARIICDA

Waxaan siinaynaa gacan buuxda qurba joogta soomaaliyeed ee ku kala sugan dunida sidii ay u midoobi lahaayeen ugana
Qaybqaadan lahaayeen dib usoo noolaynta qarka soomaaliyeed ee burburay.
Tilmaamida iyo doorashada meelaha baahida badan uqaba mashaariicda horumarinta bulshada iyo weliba nooca mashruuc ee ay aad ugu baahan yihiin iyo sidii ay macquul u noqonlahayd hirgelintoodu , xaqiijinta hirgelintooda iyo laxisaabtankooda run ahaaneed ee aanu noqon mid iska magac u yaal ah oo lacag lagu helo, waa in lahelo damaanad run ah oo lagula xisaabtamo mashruucyadaas. Inay sidii loogu talagalay u hir galeen.

11] CAAFIMAADKA

Waxaanu gacanka geysanaynaa marxaladkastaba hanagu qaadatee macquulnimadeedu in qurba joogta aqoonta gaarka ah uleh arimaha caafimaadka khuseeya ay kaqayb qaataan qiimaynta baahida caafimaadka meelaha aadka ugu baahida qaba iyo u jihayn tooda
Hay adaha shaqada ku leh.

12] WAXBARASHADA

Waxaanu gacan siinaynaa qayblibaaxna kaqaadanaynaa qiimaynta iyo horumarinta baahida waxbarasho ee dhamaan dalka sida ururin mashaariic maalgelineed qalabka waxbarashada iskuulo macalimiin qalab iyo mushaharba.

13] MAAMULADA

Waxaanu gacan buuxda siinaynaa adkaynta iyo horumarinta maamulada dawlada ee ka shaqeeya gobolada dalka oodhan haday noqon lahayd talo iyo tabaruc lashaqaytoosa intaba.

14] GOBOLADA RABA INAY NALA SHAQEEYAAN

Waanu soo dhoweyneynaa dhamaan gobolada wadanka guud ahaan iyo gaar ahaanba gobolkii raba inuu sitoosa uga qaybqaato mashaariicdayada oo raba inuu nalashaqeeyo waxaan ku soo dhoweynaynaa gacmo furan iyo weliba u mahaclin khaas ah.

15] TALAABADA XIGTA

Waxaa dhamaan matalayaasha qurbajoogta soomaaliyeed ee saxiixay isku wada raaceen dhamaan qodobada aan korku soo xusnay kadib markii mid mid ay u qiimeeyeen iskuna afgarteen inay si midaysan oo daacadnimo ku jirto ugu shaqeeyaan qarankooda bulshadooda tabaalaysan siday dib ugu soo noolayn lahaayeen qaranimadooda iyo wadankooda hooyo ee ay wada jecelyihiin mustaqbalkiisa ugana dhigi lahaayeen Soomaaliya meel nolol ka suurageli karto xayaato leh taal oo dhamaanteen iyo inta soomaali jecelba u aayaan mustaqbalka dhow.

QORAALKAN WAXAA SI WADAJIR AH U SAXIIXAY MATALAYAASHA QURBAJOOGTA SOOMAALIYEED EE KU KALA NOOL WADAMADAN HOOS KU XUSAN.
DENMARK GERMANY IRLAND ITALY NETHERLAND NORWAY NEWZELAND SWEDEN UK WAXA KALE OO ICTIRAAFAY QURBAJOOGTA SOOMAALIYEED EE KU NOOL AUSTRALIA CANADA NEWZELAND AND USA MAGAC YADOODUNA WAA AANU DAABACNAY WAXAANA SOO DHOWEYNEYNAA DHAMAAN SOOMAALIDA QURBAJOOGTA AH EE JECEL INAY CAAWIYAA WADANKOODA INAY MAGACYADOODA IYO WAXAY AYKA GEYSANKARAAN CAAWIMO KU QORAAN QOLKA IS DIIWAAN GELINTA.

Webka diiwaangelinta

www.somalijointst5atement.info
Sign in up

Wixii faahfaahin ah ee dheeraad ah la xiriir
David Wardrop
Strategies for peace (London)
Davidwardrop@lineone.net

Tel +44 207 385 6738